

Agabka Bulshadda Gobolka New York

Isha Hagaida ee Dadka Muhaajiriinta Reer New York
Siteember/Oktoobar 2022



Isbahaysaiga Laanta Socdaalka New York waxay samaysay agan si loo siiyo ilo xubnaha bulshadda iyo shuraakadayada iyo gaashaan buurtayada la shaqeeya iyaga. Buugyarah si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa iyadoo lagu salaynayo beddelka sharciyada iyo xeerarka.

Narkii ugu dambaysay ee xogta la
cusbooneysiyyay waxay ahayd: 10.12.2022

Tusmadda

- Caafimaadka **3**
- Socdaalka **4**
- Waxbarashadda **7**
- Dimuqraadiyada **9**
- Dhaqaalaha **10**
- Garo Xuquuqdaada **11**
- Dembiyada Nacaybka ah **12**
- Ilaha NYS **13**

Caafimaadka



Cusboonaysiinta Arrimaha COVID-19

- Xogtii ugu damebysay ee talaalka xoojiyaha COVID-19 waa diyaar. Xoojiyaha cusub waxaa lagu magacaabaa "bivalent" waayo waxa uu ka hortagayaa nooca feyraska ee ugu dambeeya ee Omicron iyo sidii kale viruskii ugu horeeyey.
 - Dadka reer New York ee da'doodu tahay 5 sano ama ka weyn ayaa qaadan kara xoojiyaha bivalent ugu yaraan laba bilood ka dib marka ay qaateen xoojihii ugu horeeyey ama talaalka taxanaha ah.
 - Si aad u hesho maclummaad dheeraad ah, soo booqo [ny.gov/booster](#)
- Laga bilaabo 18ka Juun 2022, ilmaha da'doodu tahay 6 billood ama ka weyn waa ay qaadan karaan talaalka COVID -19 ee Pfizer and Moderna.
 - Maclummaad dheeraad ah iyo su'aalaha inta badan la is weydiyo ee ku saabsan talaalka caruurta, soo booqo [ny.gov/VaxforKids](#)
- Haddii lagaa helay COVID-19, waxa aad heli kartaa daawo kaa caawin karta in aanay xaaladaadu khatar gaarin.
 - Daawadu waxa ay si wanaagsan kuu caawisaa marka aad u qaadato sida ugu dhaqsaha badan ka dib marka aad xanuunsato, sidaa darteed waa muhim in aad baaritaan isku sameyso oo dhakhtarkaaga la hadasho.
 - Si aad u hesho maclummaad dheeraad ah, soo booqo [ny.gov/covidtreatment](#)

Hel agab ka baaritan COVID-19 oo guriga oo bilaash ah

- Haddii aad leedahay ceymis caafimaad (ceymiska caafimaadka ee goobta shaqada ama mid aad suuqa ka iibsatay, ama barnaamijyada dawladda sida Medicaid, Medicare, ama CHIP), waxaa laguu ogol yahay ilaa 8 qalabka baaritaanka ah oo lacag la'an ah.
 - Waxa aad isticmaali kartaa farmashiiyaha ama dukaanka ka tirsan "shabakadda" taasoo aad jeebkaaga ka bixineyo \$0 ama laguu celinayo lacagtaaad jeebkaaga ka bixiso.
 - Si aad u hesho maclummaad dheeraad ah, booqo [cms.gov/how-to-get-your-at-home-OTC-COVID-19-test-for-free](#)
- In codsiga lagu soo gudbiyo [COVIDtests.gov](#) waxaa la joojiyey 2dii Siteembar waayo kongareesku ma ogolaan lacag dheeraad ah oo barnaamijkan lagu bixiyo.

Maanta Is Tallaal

- Talaalka COVID-19 waxa aad ka heli kartaan dhamaan Gobolka New York. Qof kasta oo 6 billood ah ama ka weyn waa inuu is talaalaa oo sidoo kale qaataa xoojiyaha haddii loo qoro. [ny.gov/vaccine](#).
- Tallaalka cudurka COVID-19 waa BILAASH iyadoon loo eegeyn xaaladdaada soo galootinimo ama haddii aad caymis caafimaad aad qabto iyo in kale.
- Tallaallada ayaa si baahsan ayaa waxaa looga helaa farmashiyeyasha, waaxyada caafimaadka ee maxalliga ah, rugaha caafimaadka, Xarumaha Caafimaadka ee Federaal ahaan u Qalma, iyo meelo kale oo Gobolka New York ku baahsan.
 - Booqo [Vaccines.gov](#), ZIP koodkaaga farriin qoraal ahaan ku soo dir [438829](#), ama wac [1-800-232-0233](#) (TTY 888-720-7489) si aad ballan uga samaysato meel adiga kuu dhowl.
 - Waaxyo caafimaad oo badan oo degmada ka jira ayaa fidiya rugo tallaal oo la iska tago oo aan ballan loo baahnayn ama guriga lagugu imaanayo. Ka hel maclummaad la xiriirka ee waaxda caafimaadka ee maxaliga [nysacho.org/directory](#).

Monkeypox

- Saraakiisha caafimaadka ee New York ,Mareykanka iyo dunida oo dhan waxa ay la socdaan xaaladda furuqa ee degaankooda ee goobaha aan inta badan soo sheegin faafitaanka cudurka, oo ay ka mid yihiin Gobolka New York.
- Monkeypox waa cudur naadir ah, keena caabuq laakiin aan keenin xanuun khatar ah. Hase yeeshie, calaamadihiisu waa kuwo xanuun badan, cisbitaal loo galo ama keeni kara dhimasho.
- Inkasta oo la doonayo in reer New York aanay cabsan, laakiin waa in qof kasta la socdaan xaaladda cudurka furuqa. Taasi waa in aad fahamto calaamadaha, sida uu ku fido, iyo sida loo kala qaado.
- Caafimaadka NYC waxa ay leeyihiin adeeg ka hortag oo ku qoran luqado dhawr ah [nyc.gov/monkeypox](#).
- Maclummaad dheeraad ah iyo xogtii u dambeysay, soo booqo [health.ny.gov/monkeypox](#).
- Dadka reer New York ee uu ku dhacay monkeypox ama khatarta ugu jira in uu ku dhaco ayaa loo ogol, yahay talaalka JYNNEOS.
 - Talaalka oo aad qaadato waxa ay yareyn kartaa inuu kugu dhaco monkeypox, iyadaoo sidoo kale waxa uu yareeyaa dhibaatada ka dhalan kartacalaamadaha haddii uu kugu dhaco cudurka.
 - Talaalku waa mid lacag la'an ah mana la tixgelinayo sharciga uu qofku waddanka joogo iyo degenaashaha.

Socdaalka 1/3

USCIS waxa ay kordhisay mudada Green Card oo gaarsiisay 24 bilood dib u cusbooneysiinta

- Laga bilaabo 26ka Siteembar 2022, USCIS waxa ay si toos ah u kordhineysaa mudada Kaarka Deganaashaha Rasmiga ah muddo 24 bilood ah dadka si sharci ah ku deggan wadanka oo soo gudbiya Fomka I-90 si ay u cusbooneysiin karaan kaarka oo mudadiisa ka dhamaatay.
- USCIS waxa ay wax ka bedeshay sida uu u qoran yahay ogeysiiska marka uu soo gaaro Fomka I-90 (kaasoo makii hore la ogolaa 12 bilood oo kordhin ah), waxayna bilowday in ay daabacdo foomka oo wax laga bedelay dadka codsigooda Form 1-90 aan weli looga soo jawaabin.
- Cadeynta in codsigu soo gaaray waxaa lala isticmaali kaarka ay mudadiisu dhamaatay taasoo cadeyn u ah in aad weli sharci waddanka ku degan tahay, xagga shaqada iyo haddii aad dooneyso in aad safarto.



Joogetynta tirada qaxootiga ah ee la ogolaanayo

- Maamulka Biden waxa uu ku dhawaaqay in 27ka Siteembar 2022 ay xad go'an u yeelayaan tirada qaxootiga ah ee ogolaanayo Sanadka 2023 ay noqoneysa 125,000.
- Iyada oo ay ugu wacan tahay goobaha ka shaqeeya qaxootiga ee aduunka ee la yareeyey iyo hay'adaha db u dajinta qaxootiga, waxa ay u badan tahay in aan tiradaas la gaari karin. Sanadka 2022, waxa Mareykanku ogolaaday oo kaliya 25,465 qaxooti ah.

Macluumaadka dadka dhawaanta yimid: Foomka is diiwaan gelinta iyo isbedelka cinwaanka ee ICE iyo ISAP

- Waxaa jira hay'ado kala duwan oo qaabilسان arrimaha socdaalka iyo hijrada ee dawladda mareykanka. Hay'adda Socdaalka iyo Dhaqangelinta Sharciyada Socdaalka (ICE) waa hay'adda qaabilسان fulinta sharciyada, iyo Barnaamijka Kor Kala Socoshada Degdegga ah (ISAP), waa magaca barnaamijka ICE ee la socoshada dadka soo haajira.
- Dadka qaar ayaa laga doonayaa in ay la xiriiraan ICE ama ISAP taasoo qeyb ka ah dacwadooda. Haddii aad Mareykanka ku soo gashay adiga oo ka soo talaabaty xuduudda ka dibna lagu xiray, ama lagu xiray xilli ka mid ah marka aad soo gashay Mareykanka, waxaa suurogal ah in lagaa doonayo in aad iska diiwaan geliso ICE ama ISAP.
- Macluumaad dheeraad oo ku saabsan nidaamka is diiwan gelinta, soo booqo:
 - help.asylumadvocacy.org/faqs-ice-isap (English)
 - apoyodeasilo.org/preguntas-frecuentes-ice-isap (Spanish)
- Haddii ay dacwad kaaga furan tahay Maxkamadda socdaalka, waa in aad cinwaankaaga la socodsiisaa ICE iyo maxkamadda.
 - Si aad cinwaankaaga aad bedeshay uga diiwaan geliso maxkamadda, waa in aad soo gudbisaa Foomka EOIR-33/IC, oo aad ka heli karto Maxkamadda Socdaalka ee degaanka iyo barta internetka ee justice.gov/eoir/formslist.htm. Waa in aad gaarsiisaa 5 cisho gudahood laga bilaabo maalinta aad u guurto cinwaanka cusub.
 - Macluumaad dheeraad ah, akhri:
 - ice.gov/doclib/detention/checkin/changeAddress-en.pdf (English)
 - ice.gov/doclib/detention/checkin/changeAddress-es.pdf (Spanish)
- Haddii ay dacwad kaaga furan tahay Waaxda Adeegga Socdaalka iyo Dhalashada ee Mareykanka (USCIS), waa in aad USCIS u gudbisaa cinwaanka aad degan tahay si loo xaqijiyo in warqadaha ay kuu soo diraan ku soo gaaraan oo dib u dhac ku imaanin dacwadaada. Macluumaad dheeraad ah, soo booqo uscis.gov/addresschange.

Socdaalka ^{2/3}

Talaabo Laga Qaado oo Dib Loo Dhigay Dadka

Caruurninada ku Yimaada Mareykanka (DACA)

- 5Tii Oktoobar 2022 Maxkamadda racfaanka ee Louisiana ayaa go'aan ku gaartay in DACA uusan hayen barnaamij sharciga waafaqsan marka la eego sida iminka loo dhaqan geliyey. Maxkamadda racfaanku waxa ay dacwadda dib ugu soo celisay Maxkamadda Degmada ee texas si ay u tixgeliso shariyada Maamulka Biden ee DACA 2022, kaasoo la filayo inuu dhaqan galoo 31ka Oktoobar 2022.
- Dacwad ayaa socota, sidaa darteed waxaa suurtogal ah in isbeddello dheeraad ah lagu sameeyo barnaamijka.
- Inta ka horeysa DHS waxa ay qabaneysaa oo ka shaqeyneysaa codsiyada cusbooneysiinta DACA (oo ay ka mid yihiin codsiyada ogolaashaha shaqada iyo kor kala socoshada). DHS ma qabaneysa mana ka shaqeyneyso codsiyada DACA ee ugu horeeya.
 - Haddii hadda aad haysato DACA, sharcigaaga weli waa ansax.
 - Haddii DACA -gaagu dhowaan uu dhoco, hadda cusboonaysii!
 - Haddii aad markii ugu horeysay u gudbisay USCIS codsi DACA ah oo aan weli la aqbalin, codsigaas waa la joojin doonaa. La ma socod siin doono ilaa ogeysiis dambe.
- Shakhxiyaadka hore u helay Talaabada dib-loo-dhigay ee Timaanshiyaha Carruurnimada (DACA) hadda waxay buuxin karaan foomamka I-821D (codsiga cusboonaysiinta DACA) iyo I-765 (codsiga cusboonaysiinta oggolaanshaha shaqada) ee qatka interneetka.
 - Awooddan waxaa loogu talagalay kuwa hadda ku jooga ama haysta DACA ama DACA koodu dhacay wax ka yar sannad ka hor.
 - Wixii maclummaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo cusboonaysiyo DACA qatka interneetka: uscis.gov/humanitarian/renew-your-daca



Xaaladda Ku Meel Gaarka Ah Ee Sharcigu Ilaaliyey (TPS) iyo Dib U Dhigista Ka Saaridda Waddanka (DED)

- Waxaa laga yaabaa in dawladda Mareykanku ay wadamada qaarkood u ogolaato TPS, haddii xaalado gaar ah dartood, sidaas dagaalo ka socda ama dhibaatooyin dabiici ah, taasoo aysan suurogal aheyn in ay wadankooda dib ugu noqdaan.
- Mudada ay xaaladaas ku jiraan, dadka codsada oo loo ogolaado TPS:
 - Waxaa laga badbaadiyaa in waddanka laga saaro.
 - Waxa ay heli karaan ogolaashaha shaqada iyo lambarka bulshada
 - Waxaa suurogal ah in loo ogolaado in ay safri karaan
 - Ma soo xiri karaan DHS sharciga uu waddanka ku joogo dartiis
- TPS waa xaalad ku meel gaar ah oo aan keeni karin deganaasho rasmi ah. Hase yeeshi, dadaka heysta TPS waxa ay codsan karaan waxyaabaha faa'iidda ah ee socdaalku bixiyo ama dadka aan sharciga waddanka ku aheyn xaqa u leeyihiin.
- Wadamada xilligan loo ogolaaday TPS waa:
 - Afghanistan, Burma (Myanmar), Cameroon, El Salvador, Haiti, Honduras, Nepal, Nicaragua, Somalia, Sudan, South Sudan, Syria, Ukraine, Venezuela, Yemen
- Maclummaad waddan kasta ku saabsan, shuruudaha ku xiran, mudada is diiwaan gelinta, iyo xogtii u damebysay, halkan ka hubi uscis.gov/TPS.
- Dhammaan codsadayaasha TPS waxay hadda buuxin karaan Foomka I-821, Codsga Xaaladda Ilaalisan ee Ku Meel Gaarka ah, onlayn at uscis.gov/i-821.
- Laga bilaabo 1da Luulyo 2022, USCIS waxa ay horay TPS uga saartay shuruudaha ku xiran oo loo ogolaaday deganaasho rasmi ah ama kaarka deganaashaha (green cards). USCIS waxa ay sharciga u tarjuntaa in dadka heysta TPS ee ka soo noqda safar loo ogolaaday oo "si sharci ah loo baaray loona ogolaaday in ay waddanka soo galaan", oo ka soo baxay shuruudaha aasaasiga ah ee wax ka bedelka xaaladda. USCIS waxa ay sameysay nidaamka iyo foom loogu talo galay ogolaashaha dadka heysta TPS.
- 27kii Juun 2022 waxa uu maamulka Biden kordhiyey oo balaariyey Dib U dhigista Dhaqan Gelinta DED ee dadka u dhashay Liberia ee deganaa Mareykanka ilaa 30kii Juun 2024.
 - Maclummaad dheeraad ah oo ku saabsan DED, soo booqo uscis.gov/humanitarian/deferred-enforced-departure.

Socdaalka 3/3



Ogolaanshaha shaqada ee muhaajiriin badan ayaa si toos ah loogu kordhin doonaa 540 maalmood

- Laga bilaabo 4ta bisha Maajo, 2022, USCIS waxay si toos ah u kordhin doontaa ansaxnimada ogolaanshaha shaqada ee muhaajiriin badan 540 maalmood inta ay sugayaan socodsiiinta cusbooneysiintoda.
- Isbeddelkan ayaa ka ilaalin doona kumanaan muhaajiriin ah, oo ay ku jiraan magangalyo-doon, inay lumiyaan ogolaanshaha shaqada iyadoo codsiyadooda cusboonaysiinta ay ku xayiran yihiin dib u dhaca USCIS.
- Ilaha ka yimid Mashruuca u Doodista Magangalyada (Asylum Seeker Advocacy Project) (ASAP) oo sharaxaya sharci cusub:
 - Ingiriis: help.asylumadvocacy.org/work-permits-extended-540-days
 - Isbaanish: apoyodeasilo.org/permisos-de-trabajo-extendidos-540-dias
- Wixii macluumaa dheeraad ah iyo liis dhamaystiran oo ah qaybaha ogolaanshaha shaqada ee kuwa heli doona fidinta iswada, booqo uscis.gov/eadautoextend.

Midnimada Yukreeniyaanka

- Taariikhdu markay ahayd 21ka bisha Abril, 2022, Madaxweyne Biden waxa uu ku dhawaaqay barnaamij lagu soo dhawaynayo dadka reer Yukreeniyaanka ee ka soo cararaya duulaanka Ruushka. Midnimada Yukreeniyaanka waxay u fidinaysaa waddo muwaadiniinta Yukreeniyaanka ah iyo xubnaha qoyskooda ee ka baxsan Mareykanka inay yimaadaan Mareykanka oo ay si ku meel gaar ah u joogaan muddo laba sano ah oo sii-daynta shafeed ah.
- Yukreeniyaanka ka qaybgalaya Midaynta Yukreeniyaanka waa inay ku lahaadaan taageere gudaha Maraykanka oo ogolaada inuu siiyo taageero dhaqaale inta ay joogaan.
- Wixii macluumaa dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka iyo habka codsiga, eeg bogga DHS: dhs.gov/ukraine

Ilaha loogu talagalay qaxootiga reer Afgaanistaan iyo kuwa tijaabada ku jira

- Dadka xabsiyada laga sii daayo ee reer Afgaanistaan ayaa laga yaabo in duruufaha gaarka ah ee dartood loo tixgeliyo ee soo gudbinta codsiga magan galoo doonka ee sanadlaha ah ka dib marka uu dhamaado mudada ay ku soo gudbinayaan codsiga haddii ay weli ku jiraan kor kala socosh. Macluumaa dheeraad ah, halkan ka akhri uscis.gov/humanitarian/information-for-afghan-nationals.
- Jaga bilaabo 20ka Luulyo 2022, Wasaaradda Arrimaha Dibbedda iyo USCIS waca ay isu geeyeen laba talaabo ee codsiyada SIV ee nidaamka codsiyada ee Afgaanistaan; Ogolaashaha Gudoomiyaha Hawlgalka (COM), iyo codsiga SIV. Si aad u hesho macluumaa dheeraad ah, soo booqo travel.state.gov/content/travel/en/us-visas/immigrate/special-immigrant-visa-afghans-employed-us-gov.html.
- Ilaha Dowladda Federaalka:
 - Hagidda dadweynaha USCIS ee loogu talagaly reer Afgaanistaan: uscis.gov/humanitarian/information-for-afghans
 - “Macluumaa Shaqada ee Ku Saabsan Dadka Haysta Fiisaha Gaarka Ah ee Muhaajirka Reer Afgaanistaan iyo La Sii-daayeyaasha” ee ah Afka Ingiriisiiga, Dari, iyo Pashto: justice.gov/crt/worker-information
 - Ilaha Kaalmada Reer Afgaanistaan ee dhammaan dawladda dhexe oo uu soo diyaariiyay Xafiiska Dib-u-dejinta Qaxootiga: acf.hhs.gov/orr/programs/refugees/afghan-assistance-resources
- Ilaha dib-u-dejinta:
 - Gobolka New York – I-ARC Mashruuca Dib-u-dejinta Afgaanistaan: immigrantarc.org/afghanistan
 - Magaalada New York – oo ay ku jirto khariidadda adeegyada magaalada ee lagu heli karo Dari iyo Pashto: nyc.gov/afghanistanresources
 - Galbeedka New York – Buffalo United oo loogu talagalay Daadguraynta reer Afgaanistaan: wnyrac.org
 - Albany/Caasimada gobolka – Liiska Ilaha: bit.ly/3kvWRZd
 - Deegaanka Ithaca/Finger Lakes – Liiska Ilaha Cornell Afghanistan: bit.ly/3CwfFxy
- Foomka Xog Ururinta Kowaad ee Xuquuqda Aadanaha ee lagu ogaanayo dadka u baahan in laga soo daadgureeyo Afgaanistaan: humanrightsfirst.org/afghan-evacuation

Waxbarashadda ^{1/2}

Sannad Dugsiyedka 2021–22

- NYSED iyo Golaha Maamulka Tacliinta (Board of Regents) ay ansixiyay ka-dhaafitaannada COVID-19 imtixaanada Gobolka gudihii Juun 2020, Ogat 2020, Janawari 2021, Juun 2021, Ogast 2021 iyo Janawari 2022. Haddii ardaygu helo ka-dhaafitaanka imtixaanka COVID-19, loogama baahna inay qaataan/dib u qaataan imtixaankaas si ay u qalin-jabiyaan. Markan la joogo, ma jiraan ka-dhaafid COVID-19 oo loo ansixiyay imtixaanada Juun 2022 ama Ogost 2022.
 - Inaad hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan ka-dhaafitaannada COVID-19, eeg U-doodayaasha Carruurta “Summary of Changes to Graduation Requirements due to COVID-19” (Sookoobka Isbeddellada Shuruudaha Qalinqabinta ee ay sabab u tahay COVID-19).
 - Si aad faahfaain dheeraad uga hesho arrimaha ku saabsan Xuquuqaha Imtixaanka Gobolka oo Dhan (Regents exam), fiiri U doodayaasha loogu talagalay “Xuquuqaha Imtixaanka Gobolka oo Dhan”
 - Maclumaaad ayaa lagu heli karaa luqado badan halkan advocatesforchildren.org/get_help/guides_and_resources/transition

Ilaха loogu talagalay qoysaska ardayda baranaysa Ingiriisiga

- La socodsiintu waxay muhiim u tahay hubinta in Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga (ELLs) si wanaagsan loogu adeego. Waaxda Waxbarashada ee Gobolka New York waxay abuurtay Sharciga Xuquuqda Waalidka ee Barnaamijka Barashada Luqadda Ingiriiska kaas oo soo koobaya xuquuqda muhiimka ah ee ku saabsan helitaanka waxbarashada iyo barnaamijyada ELL -yada iyo waalidkood: bit.ly/3EJdOTd
 - Maclumaaadka waxaa lagu soo qoray luqaddaha Carabi, Bengali, Shiine (La fududeeyay), Shiine (Asalka), Ingiriis, Faransiis, Haitian Creole, Karen, Nepali, Ruush, Isbaanish, Yukreeniyaan, iyo Urdu.
 - Waxaad wici kartaa Khadka Waalidka ELL [800-469-8224](tel:800-469-8224) haddii aad qabtid su'aalo ama walaacyo.

Hal Mar Kaliya ee Deynta Ardayda Laga Cafiyo

- 24Kii Agoosto 2022, Maamulka Biden-Harris waxa uu ku dhawaaqay Qorshaha Ka Cafinta Deynta ee Ardayda taasoo ah hal mar kaliya oo lala beegsaday qoysaska dakhligoodu yar yahay ama hooseeyo.
- Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka (ED) waxa ay dadka horey u qaataay gargaarka Pell Grant ka deyneysaa ilaa \$20,000 deynta ay ku leedahay ED iyo ilaa \$10,000 oo deyn ah dadka aan horay u qaaadan qaadan deeqda waxbaasro ee Pell Grant.
- Dadka deyn dhaafka loo ogolyahay waa qofka kaliya ee dakhligisu ka hooseeyo \$125,000 ama qoysaska \$250,000.
- Faahfaahinta barnaamijka waxa aad ka heli kartaa iyo talaabada xigta ee studentaid.gov/debtrelief
- Weli ma furna qabashada codsiga. Haddii aad dooneysyo in lagu soo wargeliyo, halkan ka diwaangeli iimeylkaaga ed.gov/subscriptions



Ka Dhaafidda Deynta Waxbarashada ee Ardayda

- Haddii aad u shaqeysyo dawladda ama hay'ad aan faa'iido doon aheyn, waxaa suurogal ah in aad ka soo baxdo shuruudaha ku xiran in deynta lagaa daayo.
- Maadaamaa lagu jiro xaaladda degdeggaa ah ee COVID ee Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka, qaar ka mid ah deynta waxbarashada ardayda ee dawladda dhewe ayaa laga dhaafaa shaqaalaha u shaqeeya dawladda iyo hay'adaha aan faa'iido doonka aheyn. Tani waa muhim waana fursad degdeg ah—waxa uu barnaamiju ku egyahay 31ka Oktoobar 2022.
- 250,000 oo ka mid ah shaqaalaha New York ee hay'adaha dawladda iyo kuwo aan faa'iido doonka aheyn ayaa ka soo baxay shuruudaha, iyada oo 5,000 dadka reerNew York ah laga daayey deynta celcelis ahaan \$63,935.00
- Si aad u ogaato in aad ka soo baxday shuruudaha, isticmaal jadwalka ku xusan bogga internetka ee Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka: StudentAid.gov/PSLF.
- Bogga PSLF.nyc waxa aad ka heli kartaan waxyaabo dadka New York deggan ka caawin kara ka qeyb galka barnaamijka, oo ay ka mid yihiin kulan loo qabto deyn bixiyayaasha iyo shaqaalaha.

Waxbarashadda ^{2/2}

Ilaха helitaanka kulliyadda ee loogu talagalay

ardayda aan sharciga haysan

- Hagaha cusub ee soo-galootiga ah ee xog-ogaalka ah wuxuu siiyaa ilo iyo macluumaa ardayda dugsiga sare iyo kulliyadda ee aan diiwaan - gashanayn, labadaba DACA iyo la'aanteedba, si looga caawiyo inay gaaraan go'aanno xog-ogaal ah oo ku saabsan mustaqbalakooda iyo inay helaan aaladaha ay u baahan yihiin si ay naftooda ugu doodaan: informimmigrant.com/guides/students
- Best Colleges ayaa dhawaan daabacay hage kuliyadeed oo loogu talagalay DACA iyo ardayda aan shariyeysnayn ee ku saleysan cusboonaysiinta ugu dambeysay ee DACA: bestcolleges.com/resources/undocumented-students/college-guide

Gargaarka Maaliyadeed ee Ardayda waqtiga dhiman

- Gargaarka Maaliyadeed ee Waxbarashada (TAP) ayey heli karaan ardayda wax ka dhigata SUNY, CUNY iyo kuliyadaha kale ee aan faa'iido doonka aheyn ee xilliga dhiman ah.
 - Si aad uga soo baxdo shuruudaha, waa in aad dhigato fasalka ugu horeeya sanadka 2006-07, sanad dugsiyeedka ama ka dib, oo aad qaadato 12 dhibcood ama wax ka badan laba simister, oo aad keentay darajada "C" ama ka badan celcelis ahaan.
 - Si aad u hesho macluumaa dheeraad ah, soo booqo hesc.ny.gov/pay-for-college/apply-for-financial-aid/nys-tap/part-time-tap
- Ardayda waqtiga dhiman ee TAP lama mid ah Gargaarka waxbarashada waqtiga dhiman.
 - Barnameejka Gargaarka Ee Ardayda Waqtiga Dhiman (APTS) waxa uu deeq u fidiyaa ardayda waqtiga dhiman ee ka soo baxa shuruudaha kana diiwaan gashan kuliad waxbarasho la aqoonsan yahay.
 - Si aad u hesho macluumaa dheeraad ah, soo booqo hesc.ny.gov/pay-for-college/financial-aid/types-of-financial-aid/nys-grants-scholarships-awards/aid-for-part-time-study

Kaalmada Dhaqaale ee Kulliyada iyo Xeerka NYS

DREAM

- Ma u baahan tahay lacag kulliyad? Talaabadaada ugu horeysa waa inaad buuxiso Codsiga Bilaashka ah ee Dawlada Dhexe ee Kaalmada Ardayda (Free Application for Federal Student Aid) (FAFSA). Hadda waa waqtigii la bilaabi lahaa: lacagta federaalka iyo dawlad-goboleedka ayaa marka hore timid, marka hore la adeego. Ka codso studentaid.gov/FAFSA.
- Caawimo ka hel UnderstandingFAFSA.org, mareeg cusub oo ka jawaabaya su'aalaha ugu badan ee ardayda iyo qoysaska Magaalada New York. Hagaha FAFSA ee bilaashka ah ee loogu talagalay ardayda dhigata Dugsiga Sare waxa lagu heli karaa tobantu luqadood.
- Senatoore José Peralta Sharciga Gobolka New York wuxuu ardayda aan sharciga aan haysan iyo ardayda kaleba wuxuu siinayaa inay helaan deeqaha ay NYS maamusho iyo deeqaha waxbarasho ee kaabaya qarashkooda tacliinta sare.
 - Dhammaan wixii xog ah ama sida loo codsado, booqo hesc.ny.gov/dream



Dimuqraadiyada

Si aad uga ogaato xog dheeraad ah iyo doorashada aasaasiga iyo sida ay u shaqeyyaan, daawo fiidyoowga:

- Af Ingiriisi: youtu.be/-F-xuJ04NpI
- Af Isbaanish: youtu.be/kkaEnGIk-pY

Doorashada Guud 8 Nofeembar 2022

- Taariikhda kama dambeysta ah ee is diiwaan gelinta ee Doorashada Guud waa 14ka Oktoobar 2022.
 - Ma hubtid miyaa inaad u diiwaangashan tahay inaad codayso? Ka hubi heerkaaga isdiiwaangelinta codbixiyaha barta voterlookup.elections.ny.gov
- Wuxuu aad codsan kartaa in codkaaga xillihore dhiibato (boostada ku soo dirto) haddii aadan tegi goobaha cod dhiibashada, ama aad dareen ka qabto caafimaadkaaga ama amaanka.
 - Wuxuu aad ku codsan kartaa barta internetka, iimeyl ama telefoonka inta ka horeysa 24 Oktoobar.
 - Codsiga cod bixinta qatka interneetka absenteebalot.elections.ny.gov
 - Si shaqsi ahaan: waxaad aadi kartaa xafiiska Guddiga Doorashada ee degmadaada si aad u codsato warqadda cod bixinta marka la gaaro ka ma dambays 7 Nofeember.
 - Guddiga Doorashada Degmadaada ka la soo bax www.elections.ny.gov/CountyBoards.html
 - Coddaynta ka ma maqnaanshaha wax badan ka oggow adiga oo gala boggan www.elections.ny.gov/VotingAbsentee.html
 - Hubi in shaabadda boostada ay taariikhdeedu tahay ama gacanta ka keento 8da Nofeembar.
- Wuxaaq qof ahaan u codayn kartaa wakhti hore laga bilaabo 29ka Oktoobar ilaa 6ka Nofeember, ama Maalinta Doorashada, 8ka Nofeember.
 - Barta aad ka coddaynayo halkan ka la soo bax voterlookup.elections.ny.gov
 - Deganayaasha NYC: findmypollsite.vote.nyc
- Xafiis loo tartamo waxaa ka mid ah:
 - Kongareeska: Wakiilada sanadka, Aqalka Mareykanka
 - NYS: Gudoomiyaha Gobolka, Gudmoomiye ku Xigeenka, Xeer Ilaaliyaha Guud, hanti Dhawrk, Wakiilada Sanadka ee heer gobol, Golaha Sanadka, maxkamadda Sare
 - Degaanka: qaar ka mid ah degmooyinka iyo saraakiisha garsoorka
 - Cod dhiibtayaasha degmada Buffalo waxa ay dooranayaan madaxda sare ee dugsiyada doorshadan guud

- Qodobada Kale ee Loo Codeynayo
 - Cod dhiibtayaasha gobolka oo dhan waxa ay cod ka dhiibanayaan in ay ogolaadaan in dhaqaale algu maalgeliyo mashaariicda degaanka.
 - Qoraalka oo faahfaahsan waxaa laga heli karaa www.elections.ny.gov/2022BallotProposal.html.
- Dadka codka ka dhiibanaya Magaalada New York waxa ay codkoodaka dhiibanayaan sadex qodob oo la soo jeediyey; in Sharciaga Magaalada NYC lagu daro qodob la xiriira qiimaha dadnimo, in la aburo Xafiiska Sinaashaha Xuquuqda Qowmiyadaha iyo in qiyaas loo sameeyo sicirka nolol maalmeedka. Xusuusnow in aad kaarkacod dhiibashada dhinaca kale u rogtaan si aad u aragtaan su'aalahi.
 - Wuxyaabaha lagu talinayo waxa aad ka heli kartaan racialjustice.cityofnewyork.us/ballot adiga oo macluumaa dheeraad ah ka helaya nycvotes.org/proposals.



Xuquuqdaada xaga cod bixinta

- Cod bixiyayaashu waxay booqan karaan MID KASTA oo Xarumaha Codaynta Hore ah gudaha wadanka halka ay degen yihiin, laga reebo Magaalada New York, halka cod bixiyayaasha loo magacaabay hal cinwaank ilaa HAL goob codaynta hore ah.
- Haddii aad rumeysan tahay cod-bixiye xaq u leh oo aad isdiiwaangalisay waqtigii lagu codeyn lahaa, laakiin magacaaga aan laga helin liiska cod-bixiyayaasha, waxaad codsan kartaa warqadda ku-meel-gaarka ah ama dhaarta.
- Ma bixinaysid Aqoonsi xaga laga codaynayo xataa haddii aad tahay cod bixiyahii u horeeyay.
- Weli waad codayn kartaa haddii aad la kulmayso hoy la'aan.
- Duruufaha qaarkood, weli waxaad u qalmi kartaa inaad codayso haddii lagu helay dembi.
- Wax badan oo shuruudaha u qalmida ah: nycvotes.org/how-to-vote/voting-rights
- Qaar ka mid ah shaqaalaha gobolka New York State ayaa u qalma inay helaan illaa laba saacadood lacagta shaqada lagu siiyo si ay u codeeyyaan. Fiiri bal inaad uqalanto: www.elections.ny.gov/NYSBOE/elections/TimeOffToVoteFAQ.pdf

Dhaqaalaha

Barnaamijka Deeqda ee Miraha ee Gobolka New York

- Barnaamijka Deeqda ee Miraha ee Gobolka New York waxa uu gargaar u fidiyaa ganacsatada ku jira marxaladda bilowga ah si ay ugu guueystaan in ay qeyb ka noqdaan dhaqaalaha soo kabanaya ee New York.
- Lacagta deeqda waxaay u dhaxeysaa \$5,000 ilaa \$25,000.
- Shuruudaha:
 - In aad ka mid tahay ganacsatada yaryar, ama aad tahay mid aan faa'iido doon aheyn oo dhaqanka ama farshaxanka ah, oo ay ka mid yihiin qabdaraaslayaasha madaxa banaan ee farshaxanka.
 - Bilaabay ganacsiga 1da Siteembar 2018 ama ka dib ama kujiray ganacsiga lix bilood ka hor inta aadan soo gudbin codsiga.
 - Halkii ganacsi ooleh EIN ama SSN waxaa loo ogol yahay hal deeq.
 - Haddii aadan ka soo bixin shuruudaha gargaarka dhaqaale ee COVID-19 ee New York ee Barnaamijka ka Soo Kabashada Ganacsatada Yaryar.
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha, waxyabaha la isaga baahan yahay, iyo qiiimaha ku kacaya, iyo sida loo codsado, soo booqo nyseedgrant.com. Waxaa aad heli karttaan gargaar xagga codsiga ah oo ku qoran luqado kala duwan.

Hoos u dhigista heerka laga doonayo

- Laga bilaabo 30ka 2022 Siteembar Madaxa Waaxda shaqaalaha ee New York (NYSDOL) Roberta Reardon ayaa ku dhawaaqay in heerka saacadaha dheeraadka ee shaqada hoos loo dhigi doono lagan soo yareynayo 60 ilaa 40 saacadood todobaadkii.
- Taasi waa guul u soo hoyatay shabakadda New York, qaar ka mid ah shaqaalaha saacadlaha ku shaqeeya ee gobolka ee loo diiday in ayshaqeeyaan saacado dheeraad ah wixii ka badan 40 saacadood.
- Isbedelkan waxaa loo kala qeybinayaa dhawr marxaladood, laga bilaabo 1da Janaayo 2024 ilaa 1da Janaayo 2032.
- Faahfaahin dheeraad ah iyo macluumaadka ku saabsan dhaqan gelinta waxa aad ka heli karttaan dol.ny.gov/farm-laborers-wage-board.

Barnaamijka Deyn Dhaafka ee Taksiyada (Medallion) ee NYC

- Magaakada New York waxa ay ugu talo gashay \$65 milyan oo Barnaamijka Deyn Ka Dhaafidda Medallion (MRP) si looga caawiyo Mulkiilayaasha Medilion dib qaabeysta deynta, yareynta qiimaha asalka ah ee deynta, iyo yareynta inta ay bixiyaan bil kasta.
- Shuruudaha:
 - Deyn qaatayaasha Medallion cidii ay doonaan haka qaateene ilaa 5 medallion
 - Waa inuu heystay medallion ka hor Maarsa 2021.
- Deyn kasta magaalada ayaa damaanad qaadeysa haddii uu bixin waayo deyn qaataha, taasoo bedeleysa damaanadda qof ahaaneed, taasoo wadayaasha siineysa in ay ka badbaadaan in la qaato guryahooda ama keydkooda lacageed.
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ee barnaamijkan, soo booqo www1.nyc.gov/site/tlc/about/taxi-medallion-owner-relief-program.page.
- Wadayaasha daneynaya in ay cadsadaan deyn dhaafka waa in ay balan lacag la'aan ah oo xagga sharciga ah ka qabsadaan Mulkiilaha TLC/Xarunta Adeegga Degmada ee portal.driverresourcecenter.tlc.nyc.gov ama iimeyl u soo dirtaan driversupport@tlc.nyc.gov.
 - Waxaa lagaa doonayaa lambarka leesinka TLC, Nawaaxiga (Zip Code), iyo afartalambar ee ugudambeeyaa lamnbarkaaga bulshada ama EIN si balanta laguugu qabto.
- Wadayaashu wax kale oo ay gargaar ka cadsan karaan isbahayesiga Wadayaasha ee Shaqaalaha Taksiyada. Soo wac [718-706-9892](tel:718-706-9892) ama soo booqo nytwa.org si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.



Joojinta shuruuda ka dhigidda talaalka ee ganacsiga gaarka ah ee NYC

- Laga bilaabo 1da Nofeembar 2022, Magaalada New York magaalada New York waajib kama dhigeyso in goobaha shaqadu waajib kaga dhigaan in shaqaaluhu talaalka COVID-19 qaataan.
- Ganacsatada NYC waxaa lagu dhiiri gelinayaa in qaadashada talaalka, xoojiyaha ay ku daraan nidaamka u degsan.

Garo Xuquuqdaada

Xubnaha bulshada iyo xulafada waa inay ka feejignaadaan xuquuqdooda mar kasta oo ay la macaamilayaan Socdaalka iyo Dhaqangelinta Kastam (ICE), Ilaalada Xuduudaha, ama sharci fulinta kale.

Haddii ay ku joojiyaan laanta socdaalka ama sharci fulinta kale ay ku joojiyaan, xusuusnow:

- Isdeji. Ha ka ordin. Ha iska caabin ama ha hor istaagin sarkaalka.
- Been ha sheegin, hana tusin dukumeenti been abuur ah.
- Waxaad xaq u leedahay in aad diido. Wax kasta oo aad tiraahdo waa laguu adeegsan karaa.
- Haddii wakiilku ku weydiyo inay ku baari karaan adiga ama alaabtaada, waxaad xaq u leedahay inaad tiraahdo maya.
 - Si kastaba ha noqotee, jir ahaan iskama caabin kartid.
 - Boolisku waxa laga yaabaa inay jirkaaga baaraan haddii ay hub ka shakiyan.
- Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah oo wakiilka socdaalka uu ku codsado sharcigaaga socdaalka, waa inaad tustaa haddii aad wadato.
- Haddii lagu joojiyo, lagu xiro, ama lagu dhibaateeyo sharci fulinta, isku day inaad hesho wakiilka(yada) magaca, lambarka, iyo maclumaad kasta oo lagu aqoonsan karo.
- Adiga ama qof kale oo bulshada ka tirsan sharci fuliyaha waxa aad qaadi kartaan fiidiyow ama cod duube ah waraysiga isdhexgalkiisa. Sidoo kale waxaad qori kartaa wixii dhacay ka dib markay baxaan.
- Waa sharci darro in saraakiisha sharci fulinta ay sameeyaan joogsi kasta, baaritaan, xarig, ama masaafurinta ku saleysan midabkaaga, asalkaaga, diintaada, jinsigaaga, ama qowmiyaddaada.

Waxaad u sheegi kartaa isdhexgalka wakiilada federaalka Mashruuca Difaaca Soogalootiga (Immigrant Defense Project (IDP)).
IDP sidoo kale waxay siisaa maclumaad sharci ah iyo u gudbinta muhaajiriinta la xiray, tigidhada laga jaray, ama lagu helay dambi. Wac 212-725-6422 ama iimayl u dir info@immdefense.org.



Goobaha Gaarka ah

- Gurigaaga iyo "goobaha gaarka ah" (sida meelaha shaqaalah-kaliya loogu talagalay ee goobta shaqada) waxay wataan ilaalin gaar ah oo goobaha dadweynuhu aanay samayn. Saraakiishu waxay geli karaan oo keliya meelaha gaarka ah haddii ay oggolaanshahaaga helaan ama ay ku tusaan waaran garsoor (uu saxeexay garsoore).

Goobaha la Ilaaliyo

- 27ka bisha Oktoobar, 2021, Waaxda Amniga Gudaha (Department of Homeland Security) waxay soo saartay siyaasad cusub oo xaddidaysa tallaaboooyinka dhaqangelinta ICE iyo CBP gudaha ama ku dhow "meelaha la ilaaliyo."
- Tusaalooyinka meelaha la ilaaliyo waxaa ka mid ah, balse kuma koobna oo kaliya: dugsiyada iyo xarumaha kale ee waxbarashada ama munaasabada, xarumaha daryeelka caafimaadka, goobaha cibaadada, meelaha ay carruurtu isugu yimaadaan, goobaha adeegyada bulshada, xarumaha musiibada ama xaaladaha degdegga ah, xafladaha sida aroosyada iyo aaska, iyo bannaanbaxyada dadweynaha sida dhoolatusyada iyo isu soo baxyada.
- Gobolka New York, wakiilada socdaalka federaalku kama soo xiri karaan dadka, ama aadaya ama ka baxaya, gobolka, magaalada, iyo guryaha maxkamadaha dawlada hoose, amar maxkamadeed la'aanteed.

Ka digtoonow khiyaanada socdaalka

- Waa inaad kaliya la hadashaa qareen ama Waaxda Caddaaladda (DOJ) wakiil la aqoonsan yahay si uu talo sharci ugu helo xaaladdaada.
- Weligaa caawimaad ha ka qaadan socdaal "notario", wakiilka socdaalka, diyaariyaha cashuuraha, foomamka diyaariya, ama nootaayo. Gudaha Maraykanka, "notario" qareen ma aha!

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo kiiskaaga ama aad qabto wax su'aalo ah ee socdaalka guud, wac khadka tooska ah ee Xafiiska Maraykanka Cusub 1-800-566-7636.

Dembiyada

Nacaybka ah

Bilahii u dambeeyay, waxaa jiray warbixino sii kordhayay ee demiyada nacaybka ku lidka ah xubnaha bulshadda muhaajirka.

Waa maxay dembiga nacaybku?

- Dembiga nacaybka waa demb ay dhiirigeliso eexdu.
- Qofku waxa uu galaa dembiga nacaybka marka mid ka mid ah dembiyada ka caddeeyay la galo ee beegsanaya dhibanaha sababtoo ah fikirka ama rumayn ku saabsan isirka, midabka, asalka qaranka, tafiirta, sinjiga, diinta, ku dhaqanka diinta, da'da, naafanimada ama qaabka galma, ama marka falkan loo galo iyaddoo ay keentay nooca fikirka la qaba ama waxa laga aaminsan yahay qofka.
- Badhasaab Cuomo waxa uu sameeyay Kooxda hawlgalka Degdega ah ee Dembiyada Nacaynka si ay ula dagaalamaan warbixinaha kordhaya ee eexda oo ay dhiirigeliso hanjabaado, dhibaatayn iyo rabshsad ka dhacda Gobolka New York oo dhan.
- Marka laga warbixiyo dembiga nacaybka, dhammaan macluumaadka ku saabsan waayo aragnimadaada, aqoonsiga, iyo waxa kale waxay ahaadaan qarsoodi.

Haddii aad aragto shay ama aad tahay dhibaha dembiga nacaybka, uga warbixi booliska oo soowac Qaypta Xuquuqda Aadamaha ee NYS. Soo wac 1-888-392-3644 ama Fariin qoraal ah ugu dir "HATE" lambarka 81336.

Haddii adiga ama qof aad garanayso uu ahaa dhibanah dembiga, Xafiiska NYS ee Adeegyada Dhibanaha waxa uu awoodi karaa inuu kaa caawiyo biillashada caafimaadka iyo la talinta kharashyada, aaska iyo kharashyada geerida aaskeeda, mushaharka lumay, iyo nooc yada kale ee caawimada. Soo wac 1-800-247-8035 ama booqo ovs.ny.gov.


Dadka degen NYC iyo wadamada ku xeeran

Gudaha NYC:

- Qareenka dad waynaha
 - 212-669-7250
- Qareenka Degmadda Manhatan
 - 212-335-3100
 - manhattanda.org/victim-resources/hate-crimes
- Qareenka Degmadda Brooklyn
 - 718-250-4949
 - brooklynda.org/hate-crimes-bureau
- Qareenka Degmadda Queens
 - 718-286-6000
- Guddida Xuquuqda Aadamaha NYC
 - 718-722-3131
 - nyc.gov/cchr
- Aga Badbaada ah ee Caawimada Dhibanaha
 - 1-866-689-4357

Ka baxsan NYC:

- Qareenka Degmadda Nassau
 - 526-571-3505
 - nassauda.org
- Qareenka Degmadda Nassau, Xafiiska Arrimaha Muhaajirka
 - 516-571-7756
- Hawl fuliha Degmadda Nassau Laura Curran
 - 516-571-3131
- Qareenka Degmadda Suffolk
 - 631-853-4161
 - suffolkcountyny.gov/da
- Degmadda Suffolka Waaxda Booliska, Qaypta Dembiyada Nacaybka
 - 631-852-6323
- Degmadda Suffolk, Waaxda Arrimaha Dadka laga tirada badan yahay
 - 631-853-4738
- Degmadda Westchester, Guddida Xuquuqda Aadamaha
 - 914-995-7710
 - humanrights.westchestergov.com



Ilaha NYS



Xafiiska NYS ee Maraykanka Cusub

- Haddii adiga ama qof aad garanaysaa uu u baahan yahay caawimada sharciga soo wac khadka tooska ah [1-800-566-7636](tel:1-800-566-7636). Dhammaan macluumaadka wicitaanku waa qarsoodi. Caawimada waxaa lagu heli karaa 200+ luqaddoo.

Waaxda Caafimamadka NYS

- Macluumaadka u dambeeyaa ee safmarka COVID-19, soo wac khadka tooska ah [1-888-364-3065](tel:1-888-364-3065) ama booqo ny.gov/coronavirus.
- Hel xaqiyooyinka tallaalka COVID-19 gudaha New Yorka bogga ny.gov/vaccine.
- Codso daboolida caafimamadka: soo wac [1-855-355-5777](tel:1-855-355-5777) ama booqo nystateofhealth.ny.gov.

Xafiiska Caafimaadka Maskaxda NYS

- FSu'aalaha dheeraadka ah ee ku saabsan adeegyada caafimaadka maskaxda ama si aad u hesho adeeg bixiyaha adeega caafimaadka maskaxda, soo wac [1-800-597-8481](tel:1-800-597-8481) ama omh.ny.gov.
- Haddii aad la kullanto walbahaar uu sababo gurmadii korona fayraska, soo wac [1-844-863-9314](tel:1-844-863-9314).
- Laynka Qaranka tooska ah ee Ka hortagga Isdilada: Haddii noloshaada ama qof kale noloshiisu ay khatar wayn ku sugar tahay, soo wac [911](tel:911). Haddii aad ku jirto dhib oo aad u baahan tahay caawimo degdeg ah, soo wac [1-800-273-8255](tel:1-800-273-8255) ama fariin Qoraal ah ugu soo dir "GOT5" ilaa [741-741](tel:741-741).
- Rabashada Guriga: haddii adiga ama qof kale uu xidhiidh la leeyaha uu ku maamulayo qof kale hadal, qaab dagaalansan, ama xad gudub galmo, ama farsamooyin kale, soo wac NYS Domestic Violence Hotline lambarka [1-800-942-6906](tel:1-800-942-6906).

Waaxda Shaqada NYS

- Waaxda Shaqada NYS waxaa ka go'an ilaalinta iyo sare u qaadida badbaada shaqaalahi iyo caafimamadka, mushahrka, iyo xaaladaha shaqada.
- Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan mushaharka iyo sharciyada saaada, caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada, ama ku soo xaree cabasho, soo wac [1-888-469-7365](tel:1-888-469-7365) ama booqo dol.ny.gov/safety-and-health
- Wixii ah caawimada Caymiska Shaqo la'aanta, wac [1-888-209-8124](tel:1-888-209-8124) ama booqo dol.ny.gov/unemployment/unemployment-insurance-assistance.

Qayba Xuquuqda Aadamaha NYS

- Sharciga Xuquuqda Aadamaha New York waxa uu mamnuucaa takoorka dhinacyada sida shaqada, guriyaynta, amaahda, waxbarashadda, iyo meelaha hoyga dad waynaha, oo ku salaysan da'da, isirka, asalka qaranka, sinjiga, qaabka galma, aqoonsiga sinjiga ama muuqaalka, heerka guurka, heerka ciidaanka, iyo dabaqadaha kale.
- Haddii aad dareemayso in lagu takoroay, ku soo xaree cabashada [1-888-392-3644](tel:1-888-392-3644) ama booqo dhr.ny.gov.

Ilaha COVID-19 Magaalada New York

- Dadka degen NYC ee raadinaya adeega adeeg bixiyayaasha ama ilaha kale waxay ka heli karaan diwaanada hoose:
 - Waxbarshadda: nyic.org/covid-education-resources
 - Shaqada: nyic.org/covid-employment-resources
 - Dhaqaalahi: nyic.org/covid-financial-resources
 - Cuntadda: nyic.org/covid-food-resources
 - Daryeelka Caafimaadka: nyic.org/covid-healthcare-resources
 - Ganacsiga yar: nyic.org/covid-small-business-resources

Dukumentiga qatka internetka ka fiiri ama luqado
kale iyadoo lagu qoray, booqo nyic.org/KYR ama
calaamaddan iskaangaree:



Haddii aad qabto su'aalo ama faallooyin ku
saabsan agabkan ama macluumaadka ku jira,
fadlan la xidhiidh:

Jennifer Diaz – jdiaz@nyic.org (NYC)

Bryan Lee – blee@nyic.org (Upstate NY)

Isbahaysiga Laanta Socdaalka New York (NYIC)
waa xeerka dalaayad iyo urur u doodis ah ah
oo metela in kabadan 200 oo muhaajiriin ah
iyo kooxaha xuquuqda qaxootiga dhammaan
New York.

Waxaa noo muuqda Gobolka New Yorka oo ka
xoog badan sidii hor esababtoo ah dhammaan
dadka waa la soo dhawaynayaa, waxaa loola
dhaqmaa si xaq ah, oo waxaa la siiyaa fursada
ay ku raacdeeyaan riyooyinkooda. Hiigsigayagu
waa inaan midayno muhaajiriinta, xubnaha, iyo
gaanshaan buurta markaad dhammaan dadka
reer New York way samaadaan.



New York Immigration Coalition

131 W 33rd St, Ste 610
New York, NY 10001
212 627 2227
nyic.org